Gillette Children's Specialty Healthcare

200 University Ave. E
St. Paul, MN 55101
651-291-2848
800-719-4040
(telefoon bilaa lacag ah)
www.gillettechildrens.org

## Ila soo xidhiidh

**Su'aalo Degdeg ah Ama cabashooyin**
Telefoonka caafimaad ee Kalkaalinta
651-229-3890

**Su'aalo Kale Oo ku saabsan Daryeelkaaga**
Rugta bukaanka St. Paul:
Khadka Wicitaanka Kalkaalisada
651-578-5000

Bukaanada jooga Goobaha Kale:
Kala xidhiidh lambarka Kooxdaada daryeel caafimaad Gillette.

**Ballamo**
651-290-8707

## Buugaag, DVD-yo iyo kabadan

Raadi qalabka ku saabsan

Naafada, xaaladaha caafimaad

Iyo taageerada daryeel bixiyaha.

**Khayraadada caafimaad iyo Waxbarasho**
dhismaha jaamacadda St. Paul, ee u dhaw dabaqa afaraad skyway
**651-229-3938**
hre@gillettechildrens.com

# Marka Walaalka ama Walaasha Cusbitaalka la geeyo Ka Caawinta Caruurta si ay Arintaas ugu Dulqaataan

**When Brother or Sister Goes to the Hospital: Helping Children Cope | Somali**

*waxbarashada bukaanka*
*SRI001-SO*

Marka canug cusbitaal la seexiyo, walaalaha ilmaha la dhashay cabdsi aad u weyn oo la mid ah tan ilmaha jiran uu dareemayo ayaa ku abuurtanta ilmahaas. Jawaabta dareenkooda waxay noqon kartaa hal si oo siyaabo badan ka mid ah.

Ilmihii waxay dareemayaan in waalidkood laga waday, walaalihii waxay dareemayaan in laga tegay, ama la nacay waxayna noqonayaan kuwo careysan. Waxay dareemayaan in ay iyagu mas'uul ka yihiin jirada ilmaha kale ama waxay dareemayaan in ay dembi galeen maadaama ay fikir xun ka qabeen canuga cusbitaalka la seexiyey. Waxaa kale oo ay ka cabsanayaan in iyaga xitaa, cusbitaalka la geyn doono. Hadii ilmaha qaraabo loo sii geeyo oo meel ku cusub oo aysan garaneynin oo qaab aysan garaneynin looga dhaqmayo la geeyo, dhibaato ayey ilmaha ku sii kordhin kartaa.

**Walaaluhu si kala duwan ayaa saameynta looga arkaa waxayna ku xiran tahay:**

- da'dooda
- dhererka mudada uu ilmuhu cusbitaalka ku jiro
- sida ay u daran tahay jirada heysa ilmaha cusbitaalka la seexiey ama naafanimada inta ay gaarsiisan tahay
- dhererka waqtiga caruurta waalidkood laga fogeeyey
- tayada qaabka illmaha wax loogu sharxay iyo sida looga jawaabay su'aalaha ay wa laalaha kale ka qabeen cusbitaal seexinta.
- mudnaanta la siiyey dareenka caruurta kale
- waxa ay ka xusuustaan hadii horay cusbitaal loo seexiyey
- waxa ay ka xusuustaan hadii horay waalidkood looga fogeeyey

## Waxa aad sugeyso

**Caruurtu waxay noqon karaan kuwo:**

- cunadooda iyo hadalkoodu yar yahay
- dadka ka go'an
- sameeya falal mudnaan in la siiyo ay ku doonayaan
- la soo booda murugo iyo caro hadii ay cabsadaan ama ay dareemaan in laga tegayo
- dib ugu laabta dabeecad iyaga oo da'dan ka yar ay horay u lahaan jireen (isku-kaadin, suul-nuugid, go'o ay cabsida isaga daboolaan ama alaabta ciyaarta/ tooy, faraha oo ay wax ku cunaan)

## Sida looga caawiyo caruurta ka gudubka dhibka la soo dersay

- Su'aalahooda ku saabsan cusbitaal seexinta, ka sii jawaab caruur ahaan da'dooda ku quman oo daacad ah. U ogoloow canuga in uu ku weydiiyo su'aalo dareenkiisana uu soo bandhigo. Caruurta la siiyo akhbaar aan dhameystirneyn waxay sameystaan waxyaalo khayaali ah oo ka xun waxa dhab ahaanta u jira.
- U ogoloow wiilasha iyo gabdhaha walaalaha la ah canuga cusbitaalka la jiifinayo in ay ka mid noqdaan dadka u diyaarinaya kana caawinaya jiifka cusbitaalka.
- Hadii si degdeg ah canug cusbitaal in loo seexiyo ay dhacdo, u sharax ilmaha caafimaadka qaba sida ay wax u jiraan sida ugu dhaqsiyaha badan.
- Hadii ay macquul tahay, u samee balan ay walaalaha kale cusbitaalka ku booqonayaan canuga jiran.

*Socda bogga xiga*

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.

- Metela/jila qaabka sidii cusbitaalku ahaa oo kale idinka oo isticmaalaya dad, boombalayaasha caaga ah, ama kuwa maryaha ka sameysan. Isticmaalka boombale iyada oo ciyaar ahaan la iska dhigdhigayo doorkii ay dhakhaatiirta iyo bukaanka kala ciyaareen waa qaab fiican oo ay ilmuhu ku muujin karaan dareenka ay qabaan balse ay dhibsanayaan in ay ka hadlaan.
- U aqri sheekooyin ama sii buugaag ay kalooraati kula feegaaraan oo ku saabsan cus bitaalka, ama ka caaawi in ilmuhu sameeyo buug sheeko sawiro ah oo ku saabsan sida uu dareemayo ilmaha hadii walaalkiis ama walaashiis cusbitaal la geeyo.
- Hadii ay macquul tahay, u samee canuga jiran walaalahiis booqasho ay cusbitaalka ugu tegayaan. Booqashadu waxay ka caawin kartaa caruurta in ay ka saarto khaladka ay ka fahansanaan karaan cusbitaalka ama cabsida laga yaabo in ay ka qabeen.

Hadii ay qasab noqoto in aad guriga ka maqnaato adiga oo canuga jiran cusbitaalka la gelaya darteed, isku day in aad si joogto ah maalin walba xiriir ula sameysid ilmaha guriga looga soo tegay. Halkaan waxaa ku qoran waxyaalo ka caawin kara waalidka iyo canuga cusbitaalka la seexiyeyba in ay si toos ah ugu xirnaadaan wiilasha iyo gabdhaha walaalahood ah:

- U qor “warqad” ama cajalad u duub ama talefoon u dir caruurtaada marar badan. Waa caadi hadii ay ilmaha yaryar ooyaan marka ay codkaaga maqlaan. Marka ay ooynay aan waxay rabaan in ay kuu sheegaan in ay kuu xiiseen ooyintuna waa sida kali ah ee ay kuugu sheegi karaan sidaas.
- Cajalad fiidiyoow ah ama cajaladda rikoorada ugu duub sheekooyinka marka ay seexanayaan loo aqriyo, ama teleefoonka uga aqri sheekooyinka.
- Maalin walba u dir xujooyin yaryar.
- U soo dir ilmaha guriga jooga alaabaha yar ee cusbitaalka laga helo ee aan khatarta lahayn sida waxyaalaha balaastigga ah ee raashinka la socda sida, baakadaha yaryar ee ay waxyaalaha cuntada kor looga darsado ay ku jiraan, tubada cabitaanada lagu dhuuo iyo waxyaalaha kale ee la iska tuuro ee aan khatarta ahayn. Marka aad sidaa sameyso caruurtu waxay dareemayaan in iyagana ay ka mid yihiin dadka wax loo sameynayo.

## Buugaagta caruurta ee ku caawin kara:

When Molly was in the Hospital: A Book for Brothers & Sisters of Hospitalized Children. Duncan, D. Rayve Productions, Inc., 1994.

Becky’s Story. Bethesda, Md.: Association for the Care of Children’s Health, 1981. Wuxuu ka hadlayaa dareenka walaalaha kale marka canug si degdeg ah cusbitaal loo seexiyo

Going to the Hospital. Rogers, F. New York: Putnam, 1988.Wuxuu sharxayaa waxa dhaca marka qof cusbitaal la seexiyo

A Special Gift for Mike. Walkden, M. & Congdon, B. Houston: Texas Children’s Hospital, 1988. Buug ka hadlaya dareenka wiilasha iyo gabdhaha la dhashay ilmaha dhiciska ku dhashay ama ilmaha jiran oo waalidka loogu talagay

## Cajladaha fiidiyoowga ah ee caruurta ee ku caawin kara:

My Brother is Sick. Kids Corner. Timonium, Md.: Milner Fenwick, Inc. Wuxuu ka hadlayaa dareenka qaabka ay u dhaqmaan walaalaha caafimaadka qaba marka walaalkood cusbitaal la seexiyo.

## Buugaagta Waalidka:

Going to the Hospital. Bethesda, Md.: Association for the Care of Children’s Health, 1986.

## Su’aalo?

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida ay walaalahu dhibta la soo gudboonaatay ula qabsan karaan, fadlan kala xiriir khubarada maaweelada caruurta talefoonkan 651-229-3855.

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad.
Haddii aad qabto wax su’aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.